

## DOOROSHOYINKA XANAANADA CARUURTA - XARUMAHA & GURYAHA

### Waxtarka iyo dhibaatooyinka Xarumaha Xanaanada Caruurta iyo Guryaha Xanaanada Caruurta ee qoyska

#### Xarumaha Xanaanada Caruurta

Waxay bixiyaan waqti dheer iyo mid yar oo ay ilmaha u hayaan kooxo. Caruurta waxaa loo kooxeeya wixii isku da' ah ba hal meel ayaa lagu hayaa. Xarumuhu waxay caruurta siiyan qalabka ku haboon da'da iyo dhaqdhaqaaqyo la soo qorsheeyay. Xarumaha yaryarka ahi waxa laga yaaba inay isku daraan caruurta qeybo maalintii ka mid ah.

#### ► Waxtarka

- Ku xirnanshada/helitaanka; maalin waliba wey furan yihiin sanadkoo dhanba; Diyar garoowgu waxba ma yeelayso haddii uu macalin jiran yahay ama uu fasax ku maqan yahay.
- Qorshaynta ku lug lahaanta iyo la socodsiinta waalidka wixii meeshaas ka dhaca.
- Fursad ay ilmuhu kula kulman caruur la da' ah.

#### ► Waxtar xumida

- Waxaa laga yaaba inaysan la kulmin baahida waalidka haddii ay soo daahan, isbedelaan, ama shaqo parti time ah jadwalkeeda; caadi ahaan aan awoodin inay la qabsadaan isbedelka waqtiga waalidka iyo degdegta ah.
- Kooxaha tirada badan iyo shaqaalaha oo ku yar ayaa waxa laga yaaba inay qatar geliso caruurta qaarkood iyo Qoysaska.
- Caruurta dhigata Xanaanada waxyar ama part time ama in ka yar sitimaanka oo buuxa, waxa laga yaaba inay ku adkaato sidii ay ku sameeysan lahaayeen saaxiibo ama la qabsashada caruurta kale ee dhigta waqtiga oo dhan; waxaa laga yaaba inaysan degenasho ka helin.

- Waxyaabaha looga baahan yahay Xarumaha Lisenka leh
- Waxyaabaha looga baahan yahay Barnaamijyada Da'da Iskuulka

#### Tirada Macalimiinta - Caruurta Xarumaha xanaanada

DA'DA CARUURTA	TIRADA MACALIMINTA -CARUURTA	TIRADA KOOXDA UGU BADAN
1 BIL ILAA 11 BILOOD	1:4	8
12 BILOOD ILAA 29 BILOOD	1:7	14
30 BILOOD ILAA 5 SANNADOOD	1:10	20
5 SANO ILAA WIXII KA WEYN	1:15	30

#### Guryaha Xanaanada caruurta Qoyska

Xanaano caruureed oo full time ama part time ah oo qof gurigiisa. Caruur isgu jirta da kala duwan o sidii guri oo kale lagu hayo.

#### ► Waxtarkooda

- Laga heleyaa kooxo ilmo yar ah oo hal meel lagu hayo oo ay u roontahay ilmaha qaarkood sidaasi.
- Caruurta waxa qasaba inay la joogaan waqtiga intiisa badan dad yar oo qaangarka si ay fursad ugu helaan inay si gooni ah ula joogaan qofka haya.
- Waxaa laga yaaba inay ka roon tahay markii loo eego xaga saacadaha meelaha xarumaha, si part time ah ama saacado aan xadaysnayn ama aan xad lahayn.
- Nooca xanaanada ee ugu badnaan laga helo bulshada; Dhawr nooc oo kala duwan iyo hababa ayaa laga helaa.
- Nooca sida guriga ahi waxa laga yaaba inuu u roon yahay qaar caruurta ka mida.

- Qarashka xanaanaytu waxa laga yaaba inuu xooga ka duwan yahay midka xarumaha iyo in guriga laguugu haya.

▶ **Xumaantiisa**

- Waxaad u baahanaysaa qof kale oo haddii qofka kuu haya ilmaha uu jirado aad u geysato caruurta.
- Diyaar ahaantu waxay ku xiran tahay caafimaadka qofkaas iyo isbedelka xaalada shaqsiyeedkiisa.
- Waalidka iyo qofka ilmaha u haya waxay yeelanayaan xiriir isku dhow, midkaasoo mararka qaar keeni kara dagaal hadii wada xiriirku uusan fiicnayn iyo haddii qiimaha nooca ilmo hayntu uu aad u kala duwanaado.

▶ **Waxyaabaha looga baahan yahay lisenka Guryaha xanaanada caruurta ee Qoyska**

Xanaanada caruurta ee Qoyska Tirada Waayeelka iyo Ilmaha uu hayn karo:

Tirada dadka looga baahan yahay	Tirada dada ilamaha	Tirada ugu badan ee ilmo ka yar laba sanadood	Tirada ugu badan ee ilmaha
Lisenka	Dhalasho - 11	2	6
Lisen iyo hal sano oo waaya aragnima	2-11	Ma laha	8
Lisen iyo laboo sano oo waayo aragnima	5-11	Ma laha	10
Lisen iyo hal sanno oo waayo aragnima iyo kalkaaliye	Dhalasho - 11	4	9
Lisen iyo labo sanno oo waayo aragnim iyo tababar	3-11	Ma laha	10
Lisen iyo labo sanno oo waayo aragnima, tababar iyo kalkaaliye	Dhalasho - 11	4	12

**Qoraalaha Caawinaada**

- ▶ **Warbixinta Xanaanada Markii loo baahda iyo talooyinka**
- ▶ **Qoysaska oo dhami isku mid ma aha**

**Sidoo kale fiiri**

- ▶ **Xanaanada Iskuulka ka hore**
- ▶ **Xanaanada ilmaha da'da iskuulka**
- ▶ **Au Pair**
- ▶ **Xanaanada Naaniga**
- ▶ **Qoysaska, Saaxiibada, iyo Deriska**